# XEERKA CAALAMIGA EE XUQUUQDA MADANIGA IYO SIYAASADDA.

Golaha Guud wuxuu go'aan L. 2200 A(XXI) ee 16.12.1966 ku ansixiyey isagoo u bandhigay saxiixid iyo meelmarin

Dhaqangal : 23ka Maarso,1976 sida uu dhigayo Qod.49

## GOGOLDHIG

Dalalka Dhinaca ka ah Xeerka,

Ayagoo tixgelinayaa, sida waafaqsan mabaadiida ku xusan xaashida Umm adaha Midoobay, in aqoonsiga sharafta iyo xuquuqda sinaanshaha iyo lama dhaafaanka ah kuna saabsan dhammaan xubnaha qoyska aadanaha ey saldhig u tahay xuriyadda, caddaaladda iyo nabadda aduunka.

Ayagoo aqoonsan in xuquuqdaas ay ka dhasheen sharafta aadanaha,

Ayagoo aqoonsan in, sida waafaqsan caddeynta caalamiga ee xuquuqal-insaanka, mabaadiida ey xigsanayaan dadka xorta ah oo ku dhaqmayaa xuriyadda madaniga iyo siyaasadda iyo xuriyad laga helayo cabsida iyo rabitaan, lagu heli karo keliya hadddii la abuuro shuruudo uu qofkasta ku heli karo xuquuqdiisa madaniga iyo siyaasadda iyo xuquuqdiisa ku saa bsan dhaqaalaha, bulshada iyo dhaqanka.

Ayagoo Tixgelinayaa waajibaadka Dalalka ay ku leeyihiin dadka kale iyo bulshada uu ku noolyahay, ey xil uga saaran tahay inuu u dadaalo horumarinta iyo ku dhaqanka xuquuqda lagu aqoonsan yahay Xeerkan.

Waxay ku Heshiiyeen Qodobada soo socda:

## QAYBTA 1-aad

### Qodobka 1-aad

1. Dhammaan dadyowga waxay leeyihiin xaqa aaya ka talinta. Ayagoo ku dhaqmayaa xaqaas, waxay si xor ah u caddeynayaan xaalladdooda siyaasadeed ayagoo raadsanayaa horumarkooda dhinaca dhinaca dhaqaalaha bulshada iyo dhaqanka.

2. Dhammaan dadyowga si ay u gaaraan ujeeddadooda, waxay si xor ah u gadi karaan dhaqaalahooda iyo ilahooda dabiiciga taasoo aan wax dhibaato ah loo gaarsiinayn waajibaadka ka dhasha iskaashiga dhaqaalaha ee caalamiga oo uu saldhig u yahay mabda'a ku saabsan ka wada faa'ideysiga iyo sharciga dawliga. Hase yeeshee marna dadka lagama reebi karo si uu u helo quutal-daruuriga.

3. Dalakka Dhinaca ka ah Xeerkan, oo ay ku jiraan kuwo leh mas'uuliyadda maamulka Dhulalka aan xorta ahayn iyo Dhulalka Amaanada, waxay dhiirigelinayaan xaqa aaya-ka-talinta waxayna sharfayaan xaqaas ayagoo raacaya Qodobada Xaashida Ummadaha Midoobay.

## QAYBTA II-aad

### Qodobka 2-aad

1. Dal kasta oo dhinac ka ah Xeerkan, wuxuu ballanqaadayaa inuu dhowro una xaqiijiyo, dhammaan dadka ku nool dhulkiisa, ayadoo la tixgelinayo Sohdimihiisa, xuquuqda lagu aqoonsaday Xeerkan, isagoo aan tixgelinin jinsiga, midab, lab ama dhedignimo, afka, diinta, afkaarta siyaasadeed ama kuwo kaleba, a salka dhinaca qaranka ama bulshada, hantida, dhalashada ama xaalad kale.

2. Haddii aysan hore uga jirin sharciga ama xeerar Dalkasta oo dhinaca ka ah Xeerkan wuxuu ballan qaadayaa inuu qaado tallaabooyinka lagama maarmaanka ah ee ku habboon, ayadoo la raacayo habkiisa Dastuuriga ah iyo Qodobada Xeerkan, sidii la soo dejin lahaa sharciyo ama xeerar sidii hadba loogu baahdo dhaqan gelinta xuquuqda uu aqoonsanayo Xeerkan.

3. Dal kasta oo Dhinaca ka ah Xeerkan wuxuu ballan qaadayaa:

(b) Inuu hubiyo in qof kasta oo xuquuqdiisa ama xuriyadahiisa Xeerkan lagu aqoonsaday, lagu xadgudbay, uu leeyahay abaalmarin waxtar leh in kastoo xadgudubkaas ay sameeyaan dad hawshooda rasmiga ah fulinaya.

(t) Inuu hubiyo in qof kasta oo raadsanaya abaalmarintaa uu xaq u yeelan doono, Maxkammadda Hay'adaha Maamulka ama Sharci dejinta awoodda leh ay caddeyaan ama hay'ad
ka kale oo awood u leh sida uu dhigayo Habka Sharciyeed ee Dalkaas, ay u suurtageliyaan raadin xal sharciyeed.

(j) Inuu hubyo in Hay'adaha qaabilsan ay fulin doonaan tallaabooyinka abaalmarintaas markii la oggolaado.

Qodobka 3-aad

Dalalka dhinaca ka ah Xeerkan waxay ballan qaadayaan inay hubiyaan inay ragga iyo dumarka ay lahaan doonaan xuquuq sinan xagga xuquu qda madaniga iyo siyaasadeed ee lagu tilmaamay Xeerkan.

Qodobka 4-aad

1. Markii lagu jiro xaalad degdeg ah oo si rasmi ah lagu dhawaaqay oo dhibaato u keeni karta noolosha qaranka, Dalalka Dhinaca ka ah Xeerkan waxay qaadi karaan tallaabooyin wax uga dhimi kara waajibaadka uu tilmaamay Xeerkan ilaa xad ay lagama maarmaan u noqoto duruufta xaaladda, hase yeeshee waa inaysan tallaabooyinkaasi kaga soo horjeedin waajibaadkooda kale ee sharciga Dawliga keeninna kala soocid xagga jinsiga, midabka, labnimada iyo dhedignimada, afka, diinta ama asalka bulshada.

2. Qodobkan ma fasaxayo in laga durko Qodobada 6,7,8 ( lambarada 1 iyo 2 ), 11,15,16 iyo 18aad.

3. Dal kasta oo dhinaca ka ah Xeerkan, kana faa'ideysanaya xaqa wax ka durkidda waa inuu si degdeg ah u soo ogeysiiyaa Dalalka kale oo dhinac ka ah Xeerkan, ayadoo la sii marinayo Xoghayaha Guud ee Ummadaha Midoobey, qodobada laga durkay iyo sababaha keenay.

Sidoo kale waa la soo sheegaa ayadoo la soo marinayo isla Hay'addii, taariikhda ay dhammaato ka durkidda.

Qodobka 5-aad

1. Qodob ka mid ah Xeerkan looma fasiri karo inuu awood u siinayo Dal, Koox ama Qof inuu isku mashquuliyo hawl ama u sameeyo fal ujeeddadiisu tahay baabi'inta mid ka mid ah xuquuqda iyo xuriyaddaha lagu aqoonsaday halkan ama xadidaadooda inta ka badan inta u fasaxay Xeerkan.

2. Wax xayiraad ah ama ka durkid lagama sameyn karo xuquuqda asaasiga ee bani-aadamka oo la aqoonsan yahay ama ay ka jiraan Dalalka Dhinaca ka ah, Xeernidaamiyeyaal ama caadooyin ayadoo marmarsiinyo laga dhigayo in Xeerkan uusan aqoonsanayn xuquuq-daas ama inuu aqoonsanayo ilaa xad hoose.

QAYBTA III-aad

Qodobka 6-aad.

1. Qof kasta wuxuu xaq ku leeyahay Noolasho. Xaqaas waa in sharci lagi ilaaliyaa. Qofna lagama qaadi karo naftiisa si bareer ah.

2. Dalalka aan tirtirin ciqaabta dilka, waxaa ciqaabta dalka lagu xukumi kara dembiyada aad u culus sida waafaqsan sharciga lagu dhaqmayo markii dembigu uu dhacay uusanna ka soo horjeedin qodobada Xeerkan iyo Xeerka ka hortegidda iyo ciqaabta dembiga dilka. Ciqaabtaas waxaa lagu fulink karaa ayadoo u ka jiro xukun ay soo saartay Maxkamad qaabilsan.

3. Haddii qaadista nafta noqoto dembi dil ah, waxaa loo qaadayaa in qodobkan uusan u oggolaanayn dalka dhinaca ka ah Xeerkan inuu sinna ka durko waajibaadka ay u saareen qodobada Xeerka ka-hor-tegidda iyo ciqaabta dembiga laynta dadweynaha (genocide).

4. Qofka lagu ciqaabay dil, wuxuu xaq u leeyahay inuu codsado cafis ama dhimidda ciqaabta. Cafiska ama dhimmidda ciqaabta dilka waxaa laga oggolaan karaa dacwadaha oo dhan.

5. Xukunka dilka laguma ciqaabi karo dembiyada ay galeen dad da'dooda ay ka yar tahay 18 sano, lagumana fulin karo haween uur leh.

6. Dalka Dhinaca ka ah Xeerkan ma cuskan karo qodobkan siuu dib u dhigto ama uu kaga hortago tirtiridda ciqaabta dilka.

## Qodobka 7-aad

Qofna laguma ciqaabi karo, lagumana sameyn karo jirdil ama fal ka baxsan bani-aadamnimada ama mid sharaf darra ah. Gaar ahaan qofna isagoo aan oggolayn laguma sameyn karo tijaabo caafimaad ama cilmiyeed.

## Qodobka 8-aad

1. Qofna lama addoonsan karo; Addoonsiga iyo ganacsiga addoonada nooc kasta ha ahaadee waa mamnuuc.

2. Qofna laguma shaqeysan karo ayadoo aan wax la siinin (Servitude).

(b).Qofna lagama dooni karo inuu qabto shaqo khasab ama sandulle ah.

(t).Lambarka 3(b) kama reebayo dalalka dembiyada lagu ciqaabo xarig la socda shaqo khasab ah haddii shaqadaas khasabka ah uu ka xiriiro ciqaab lagu soo saaray xukun ka soo baxay maxkamad qaabilsan.

(j).Inta ku saabsan xarafkan erayada "shaqo khasab ama sandulle" kuma jiraan:

(i) Shaqo ama adeeg aan lagu tilmaamin xarafka (t), oo laga doonayo qofka ku xiran amar sharciyeed ay soo saartay maxkamad ama qofka xarigga laga soo daayey siideyntaasoo ku xiran shuruud.

(ii) Adeeg kasta oo leh dabeecad military ah iyo dalalka lagu aqoonsado diidmada damiirka, shaqada qaranka ee sharciyan laga doonayo dadka u diidaya damiir ahaan.(Conscientious objectors).

(iii) Adeeg kas ta oo la doonayo in la qabto marka ay jiraan xaalado degdeg ah ama musiibado khatar gelinaya nolaashada ama wanaagga bulshada.

(iv) Shaqo ama adeeg kasta oo ka mid ah waajibaad caadiga ee madaniga.

## Qodobka 9-aad

1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay xuriyaddiisa iyo nabadgelyadiisa qofnimo. Qofna lama xiri karo lagumana rogi karo xayiraad bareer ah. Qofna xuriyaddiisa lagama qaadi karo marka laga reebo sababaha iyo sida waafaqsan habka uu soo dejiyey sharciga.

2. Qofka la xiro waa in loo sheegaa marka la xirayo sababaha xiriddiisa isagoo si degdeg ah loo sheegayo qodobada lagu soo eedeeyey.

3. Qof kasta oo la xiray ama lagu soo rogay xayiraad ayadoo la raacayo qodobka lagu eedeeyey waa in si degdeg ah la hor keeno garsoorka ama sarkaal kale ee uu sharcigu u fasaxay inuu isticmaalo awoodiisa garsooreed, wuxuuna xaq u leeyahay in waqti macquul ah gudihiisa lagu qaado dacwad ama la siidaayo. Nidaam guud inuu noqdo ma aha in garsugeyaashu ay xirnaadaan hase yeeshee siideyntoodu waxaa lagu xiri kara damaanado ay ku yimaadaan maxkammadda horteeda markii dacwadda la qaadayo ama mar kasta oo ay maxkammaddu u yeerto iyo markii la fulinayo xukunka.

4. Qof kasta oo xuriyadiisa laga qaaday isagoo la xiray ama lagu soo rogey xayiraad, wuxuu xaq u leeyahay inuu u dacwoodo Maxkamad, si Maxkamaddu ay si degdeg ah go'aan uga gaarto sharcinimadii xarrigiisa ay tahay mid aan waafaqsaneyn sharciga.

5. Qof kasta oo lagu qaaday ama lagu rogay xayiraad ama xarrig aan sharci ahayn, wuxuu xaq u leeyahay magdhaw oo la fulin karo;

## Qodobka 10-aad

1. Dhammaan dadka laga qaaday xuriyaddooda waa in lagu dhaqa si dadnimo lana dhawra sharaftiisa qofnimo.

2.(b) Eedeysaneyaasha, marka laga reebo duruufo aan caadi ahayn, waa in laga socaa dembileyaasha waana in si gooni ah lagu dhaqa taasoo ku habboon xaalladdooda ku saabsan dadka aan dembiga lagu xukumin.

(t) Eedeysanayaasha caruurta (juvenile) waa in laga soocaa dadka qaan gaarka, ayagoo si degdegsiimo leh la her keenaa Maxkammadda si dacwadooda go'aan laga gaaro.

3. Habka xabsiga waa inuu ka kooban yahay ku dhaqmidda maxaabiista oo ku saleysan mabda'a hagaajintooda iyo dib-u-soo-celintooda bulshada. Dembileyaasha dhallinyarada waa in laga soocaa qaan gaarka ayagoo lagu dhaqayo habka ku habboon da'dooda iyo xaalladooda sharciyeed.

Qodobka 11-aad

Qofna lagama xiri karo sababta fulin la'aanta waajibaad heshiis.

Qodobka 12-aad

1. Qof kasta oo si sharci ah ku jooga Dal, wuxuu sohdimihiisa, xaq ku leeyahay inuu si xor ah ku socdo isagoo leh xuriyad ah u dooran karo hoygiisa.

2. Qof kasta wuxuu si xor ah uga bixi kara dal kasta, oo uu ku jiro dalkiisa.

3. Xuquuqda kor lagu soo sheegay laguma rogi karo xayiraad iyo marka laga reebo kuwo uu sharcigu oggol yahay, ayna yihiin lagama maarmaan si loo ilaaliyo nabadgeliyada qaranka, nabadgelyada guud, caafimaadka dadweynaha ama anshaxa, ama xuquuqda iyo xuriyadaha dadka kale, lana socdo xuquuqda kale ee lagu aqoonsado Xeerkan.

4. Qofna si bareer ah loogama qaadi karo xaqa soo gelidda dalkiisa.

Qodobka 13-aad

Qofka ajnabiga ee jooga Dal dhinaca ka ah Xeerkan waxaa looga saari kara keliya ayadoo la fulinayo go'aan lagu gaaray sida waa faqsan sharciga waxaana, marka laga reebo sababaha nabadgelyada qaranka, in loo oggolaado inuu keensado sababo lid ku ah ka saaridda, isagoo xaq u leh in dacwaddiisa dib loo fiiriyo, lana dhageysto isaga ama wakiilkiisa, hay'ad qaabilsan ama qof ama dad si gaar ah ay u magacawday hay'adda qaabulsan, hortooda.

Qodobka 14-aad

1. Dhammaan dadka maxkammadaha hortooda way u siman yihiin. Sidii loo caddeyn lahaa eedda lid ku ah ama xuquuqdiisa iyo waajibaadkka uu ku leeyahay dacwadda sharciyeed, qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in lagu q aado dacwad xaq ah oo dadweynaha u furan dhageysigeeda, oo ay qaadeyso maxkamad qaabilsan oo xor ah laguma dhisay sharci. Weriyeyaasha iyo dadweynaha waa laga reebi kara dhammaan ama qayb ka mid ah dacwadda, sababaha anshaxa, xasiloonida guu d ama nabadgelyada qaranka, awgood, bulsho dimuqradi dhexdeeda, ama lagu ilaaliyo danta nolosha gaar ahaaneed ee Dhinacyada ama maxkamadda la noqoto inay jiraan duruufo gaar ahaaneed, in faafintu ay waxyeelaynayso danta caddaaladda, hase yeeshee xukunka dacwadda ciqaabta waa in mar kasta si guud loo faafiya marka laga reebo ilaalinta danta dhallinyarada ama dacwaddha ku saabsan guurka iyo waalidnimada caruurta.

2. Qof kasta oo lagu eedeeyey dembi ciqaabeed wuxuu xaq u leeyahay in loo qaato inuu yahay qof aan dembi lahayn ilaa lagu eedeeyo dembiga si sharci ah.

3. Markii lagu caddeenayo eedeynta ciqaabeed ee lid ku ah, qof kasta wuxuu xaq u leeyahay ugu yaraan dammaanadaha hoos ku qoran si sinaanshaha ah:

(b) In si degdeg ah loo soo sheego, si tifaftiran iyo sababta af uu fahmaayo, dabeecadda iyo sababta eedeynta lagu sameeyey.

(t) In la siiyo waqti macquul ah iyo tashiilaad uu ku diyaarsanayo difaaciisa isagoo la xiriiraya qareenka uu isagu doorto.

(j) In dacwadda si degdeg ah lagu qaado.

(x) In dacwadda la qaado isagoo goobjoog ka ah, isagoo iskiisa isdifaacaya ama qareenka uu doortay; in la soo sheego haddii uusan lahayn xaqa kaalmada qareenka; iyo in la siiyo kaalmada qareenka, haddii taasu loogu baahdo ilaalinta danta caddaaladda iyo in la siiyo kaalmadaas lacag la'aan haddii uusan haysan lacag uu ku bixiyo.

(kh) Inuu su'aalo ama loo su'aalo, markaatiyaasha lid ku ah iyo in loo helo, lana su'aalo markhaatiyaahiisa isla shuruudihii kuwo lagu dhaqmay markhaatiyaasha lid ku ah isaga.

(d) Inuu helo lacag la'aan khidmada turjubaanka haddii uusan fahmayn ama ku hadlayn afka loogaga hadlayo Maxkamadda.

(r) Inaan lagu khasbin inuu furo wax isaga lid ku ah ama uu qirto dembiga.

4. Markii la qaadayo dacwad lid ku ah dallinyaro habka la raacayo waa inuu tixgeliyaa da'dooda iyo baahida dib-ku-soo-celintooda bulshada.

5. Qof kasta oo lagu helay dembi wuxuu xaq u leeyahay in xukunkii sa iyo xarigiisa ay dib u fiiriso maxkamad ka sarreysa sida uu qabo sharcigu.

6. Markii qofka lagu xukumo dembi ciqaabeed xukun kama dambeys ah, kadibna xukunkiisa la beddelo, ama la cafiyo ayadoo ay soo baxeen xaqaa'iq cusub kuwaasoo muujinaya inay dhacday caddaalad darro, waa in la siiyaa magdhaw sida waafaqsan sharciga, haddii aan la caddeynin in sheegid la'aanta xaqiiqada waqtigii habboonaa uu mas'uul ka ahaa dhammaan ama qayb ahaan isaga naftiisa.

7. Qofna mar labaad dacwad laguma qaadi karo, lagumana ciqaabi karo dembi hore lagu xukumay ama laga sii daayey sida waafaqsan sharciga iyo habka ciqaabeed ee dal kasta.

## <u>Qodobka 15-aad</u>

1. Qof na laguma xukumi karo dembi ciq aabeed gef u galay oo aan ka koobnayn dembi, sharci qaran ama dawliga, markii uu dhacay. Sidoo kale ciqaab ka culus laguma xukumi karo kan u dhigan markii uu dembiga dhacay. Haddii, kadib markii uu dhacay dembigu, la soo saaro qodob sharciyeed oo dhigaya ciqaab ka yar, dembiiluhu waa inuu ka faa'ideystaa qodobkaas.

2. Qodobkan wax raad ah kuma yeelanayo dacwadda iyo ciqaabta qof sameeyey fal ama gef oo ahaa dembi markii uu dhacay sida waafaqsan mabaadiida guud ee sharciga oo ay aqoonsan yihiin dalalku.

Qodobka 16-aad

Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in qof ahaantiisa lagu aqoonsado sharciga hortiisa.

Qodobka 17-aad

1. Qofna laguma sameyn karo tadakhul sharci darra ah nolashadiisa gaar ahaaneed, qoyska, guriga ama warqadihiisa, lagumana qaadi karo weerar sharci darra ah sharaftiisa iyo magaciisa.

Qodobka 18-aad

1. Qof kasta wuxuu leeyahay xaqa fikaradda, niyadda iyo diinta. Xaqan wuxuu kaloo saameeya inuu leeyahay xuriyad uu ku dhaqmo ama qaato diin ama aqiidad uu isagu door to iyo xuriyad uu keligiis ama isagoo dad kale ee bulshada la kaashanaya uu si fagaara ah ama si gaar ahaaneed u ku muujiyo diintiisa ama aqiidadiisa, tukashada, meelmarinta, ku dhaqanka iyo barashada.

2. Qofna lama cabsi gelin karo taasoo raad ku yeeshay xuriyaddiisa ku dhaqanka ama qaadashada diinta ama aqiidada uu doorto.

3. Xuriyadda muujinta qofka diintiisa ama aqiidadiisu waxaa lagu soo rogi karaa xayiraad ilaa xad oo uu tilmaamo sharciga loona baahan yahay si loo ilaaliyo nabadgelyada guud, xasiloonida, caafimaadka ama anshaxa ama xuquuqda xasaasiga iyo xuriyadaha dadka kale.

4. Dalalka dhinaca ka ah Xeerkan waxay ballan qaadayaan inay dhowraan xuriyadda waalidiinta iyo weliga sharciga markay khuseyso, si loo hubiyo in barbaarinta diinta iyo anshaxa caruurtooda ay la socoto fikradahooda.

Qodobka 19-aad

1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu ku fikiro isagoo aan fara gelin lagu samaynin.

2. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay xuriyadda muujinta fikradiisa; Xaqaan wuxuu kaloo saameeya xuriyadda raadinta, helidda iyo gudbinta wsrarka iyo fikradaha nooc_kasta leh oo aan la fiirinaha sohdimaha ha lagu muujiyo af, qoraal, daabicid, qaab faneed ama qaab kale ee uu isagu doorto.

3. Fulinta xuquuqda ku xusan lambarka 2-aad ee qodobkan waxaa la socda waajibaad iyo xilal gaar ahaaneed. Sidaas awgeed waxaa lagu sameyn kara xayiraadyo ilaa xad, hase yeeshee kuwaas waxay noqon karaan kuwo ay tilmaameen sharcigu lagama maarmaana u yihiin:

(b) Si loo dhowro xuquuqda ama magaca dadka kale.

(t) Si loo ilaaliyo nabadgelyada qaranka ama xasiloonida guud ama caafimaad guud ama anshaxa.

Qodobka 20-aad

1. Fidinta Propagaandada dagaalka waxaa lagu mamnuucayaa sharciga.

2. Dhii rigelinta neeceb qaran, jinsiyeed ama diineed oo kicineysa kala soocid, dagaal ama rabshado waxaa lagu mamnuucayaa sharci.

Qodobka 21-aad

Xaqa isku imaanshaha dadka si nabadgeliya ah waa in la aqoonsadaa. Xayiraad laguma sameyn karo fulinta xaqaas marka laga reebo kuwo waafaqsan sharciga kuwaasoo ay lagama maarmaan u yihiin bulsho dimuqradi ah si loo ilaaliyo nabadgelyada qaranka ama nabadgelyada guud, xasiloonida guud, daryeelidda caafimaadka guud ama anshaxa ama dhowridda xuquuqda iyo xuriyadaha dadka kale.

Qodobka 22-aad

1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay xuriyadda isku xiriirka dadka kale oo uu ku jiro xaqa abuurista iyo ku biirista Ururada shaqaalaha si loo ilaaliyo danahiisa.

2. Wax xayiraad ah looguma rogi karo fulinta xaqaas marka laga reebo kuwo uu tilmaamay sharcigu looguna baahan yahay bulsho dimuqraadi ah si loo ilaaliyo nabadgelyada qaranka ama nabadgelyada guud, xasiloonida guud, daryeelidda caafimaadka guud ama anshaxa ama dhowridda xuquuqda iyo xuriyadaha dadka kale.

Qodobkaan ma reebayo in xayiraad sharci ah lagu soo rogo xubnaha ciidamada qalabka sida iyo boliiska si ay u fulin lahaayeen xaqaan.

3. Qodobkaan awood uma siinayo Dalalka Dhinaca ka ah Xeerka Ururka Shaqaalaha Adduunka ee 1948, inta ku saabsan xuriyadda isku xiriirka iyo ilaalinta xaqa Uruurinta, inay qaadaan tallaabooyin sharciyeed oo wax yeeleenaya ama ku dabbaqid sharci hab waxyeeleenaya dammaa nadaha lagu tilmaamay Xeerkan.

Qodobka 23-aad

1. Qoysku wuxuu yahay qayb xasaasi iyo dabiici ka yahay bulshada waxaana looga baahan yahay bulshada iyo Dawladda inay dhowraan.

2. Xaqa ragga iyo dumarka gaaray da'ada guurka inay guursadaan, abuuraanna qoys waa in la aqoonsadaa.

3. Guur aan raali ka ahayn dadka isguursanayaa lama oggolaanayo.

4. Dalalka Dhinaca ka ah Xeerkan, waa inay qaataan tallaabooyin habboon si ay u hubiyaan sinnaanta xuquuqda iyo waajibaadka dadka isguursanaya, muddada ay isqabaan iyo waqtiga kala tegidda. Markii ay kala tegaan waa in lagu tala galaa ilaalinta lagama maarmaanka ee caruurta.

Qodobka 24-aad

1. Ilma kasta isagoo loo kala soocin xagga jinsiga,midabka, lab iyo dhedignimo, afka, asalka qaranka ama bulshada, hantida ama dhalashada, wuxuu xaq u leeyahay tallaabo kasta oo lagu ilaalinayo sida ay qabto xaalada ilmaha aan qaan gaarin oo laga doonayo qoyskiisa, bulshada iyo dawladda.

2. Ilmo kasta waxaa la diiwaangelinayaa isla markii uu dhasho wuxuu lahaanayaa magac.

3. Ilmo kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu qaato jinsiyad.

## Qodobka 25-aad

Muwaadin kasta wuxuu xaq iyo fursad u leeyahay, ayagoo aan la kala soocin sida uu qabo Qodobka 2-aad ayadoo aan wax xayiraad ah lagu soo rogin:

(b) Inuu ka qayb galo maamulka arrimaha guud, si toos ah ama isagoo si xor ah u doortay wakiillo.

(t) Inuu doorto ama la doorto, doorashooyin run ah ee la dhigayo waqti ka waqti, kuwaasoo leh sinnaansho laguna qaban doono habka codka qarsoodiga, dammaanadna qaadayo in xuriyadda fikradda iyo rabitaanka dadka wax doonayaa.

(j) Inuu si sinaan ah uga qayb geli karo shaqooyinka guud ee dalkiisa.

## Qodobka 26-aad

Dhammaan dadka waxay u siman yihiin sharciga waxayna xaq u leeyihiin ayagoon lobo kala soocin in sharcigu uu si sinnaan ah u ilaaliyo. Ayadoo la fulinayo arrintaas, sharcigu wuxuu mamnuucayaa kala soocid . dammaanad qaadeyna in dhammaan dadka la siiyo ilaalin siman oo lid ku ah kala soocid xagga jinsiga, midab, lab iyo dhedinimo, afka, diinta, siyaasadda ama fikrad kale, asalka qaran ahaan ama bulshada, hantida, dhalashada ama xaalad kale.

## Qodobka 27-aad

Dalalka ay joogaan dad tiradoodu yar tahay oo asal ahaan, af-ahaan ama diin-ahaan ka duwan yihiin dadka intooda badan, dadkaas yar looma diidi karo inay la dhaqmaan dad katirsan beeshooda ayna la wadaagaan dhaqankooda, inay ku dhaqmaan diintooda ama isticmaalaan afkooda.

.../...

## QAYBTA IV-AAD

### Qodobka 28-aad

1. Waxaa la dhisayaa Guddiga Xuquuqal Insaanka (oo Xeerkan lagu tilmaamay Guddiga). Guddigu wuxuu ka kooban yahay 18 xubnood wuxuuna qabanayaa shaqooyinka ku xusan halkan.

2. Guddigu wuxuu ka kooban yahay muwaadiniinta Dalalka Dhinaca ka ah Xeerkan oo leh anshaxa aad u heer sarreya, leeyihiinna khibrad la yaqaanno xagga xuquuqul insaanka ayadoo la tixgelinayo in qaarkood ay leeyihiin waaya aragnimo xagga sharciga.

3. Xubnaha Guddiga waxaa lagu dooranayaa, kuna shaqeynayaa awooddooda shakhsiyeed.

### Qodobka 29-aad

1. Xubnaha Guddiga waxaa lagu dooranayaa cod qarsoodi ah waxaana laga dhex dooranayaa liis ka kooban dad leh aqoonta lagu tilmaamay qodobka 28-aad ayagoo ujeeddadaas ay ku soo magacaabeen Dalalka Dhinaca ka ah Xeerkan.

2. Dal kasta oo Dhinac ka ah Xeerkan wuxuu magacaabi karaa dad aan ka badnayn laba qof. Dadkaas waa inay yihiin muwaadiniinta Dalka soo magacaabay.

3. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in la magacaabo.

### Qodobka 30-aad

1. Doorashada hore waxaa la qabanayaa muddo aan ka badnayn lix bilood ka dib taariikhda dhaqan galka Xeerkan.

2. Ugu yaraan afar bilood ka hor taariikhda doorashada kasta ee Guddiga, midda aan ahayn tan lagu buuxinayo jagada la waafaqsan Qodobka 3'-aad, Xoghayaha Guud ee Ummadaha Midoobay wuxuu u qorayaa warqad qoraal ah dhammaan Dalalka dhinac ka ah Xeerkan inay soo gudbiyaan magacyada xubnaha Guddiga Saddex Bilood gudahood.

3. Xoghayaha Guud ee Ummadaha Midoobay wuxuu diyaarinayaa liis ku qoran magacyada dadka la soo magacaabay sida xuruufaha magacyadooda ay u kala horreyaan ayadoo la tilmaamayo Dalalka Dhinacyada ah ee soo magacawday, wuxuuna u soo gudbinayaa Dalalka Dhinaca ka ah Xeerkan, muddo aan ka badnayn bil ka hor taariikhda doorasho kasta.

4. Doorashada xubnaha Guddiga waxaa lagu qabanayaa shirka Dalalka Dhinaca ka ah Xeerkan oo uu isugu yeeray Xoghayaha Guud ee Ummadaha Midoobay, laguna qabanayo Xarunta Ummadahh Midoobay shirkaas oo ansaxaya marka ay joogaan saddex meelood laba meel Dalalka Dhinaca ka ah Xeerkan, xubnaha loo dooranaya Guddiga waxay noqonayaa kuwo ugu cod badan oo ka heleen Wakiilada Dalalka Dhinaca ee jooga codna bixinaya.

Qodobka 31-aad

1. Guddiga kuma jiri karaan hal ka badan muwaadiniinta isla Dalka.

2. Markii la dooranayo Guddiga, tixgelin waxaa la siinayaa qaabka deegaanka juqraafiyada ee xubnimada iyo wakiilnimada qaababka k ala duwan ee bulshada iyo habka sharciyeed.

Qodobka 32-aad

1. Xubnaha Guddiga waxaa loo dooranayaa muddo afar sano ah. Dibna waa la dooran karaa haddii la soo magacaabo. Hase yeeshee muddada sagaalka xubnood ee lagu doortay doorashada hore waxay dhammaana ysa laba sano kaddib; kaddib doorashada hore, magacyada sagaalka xubnood waxaa dooranaya Guddoomiyaha isagoo ku dooranaya qorituur, shirka lagu tilmaamay qodobka 30 lambarkiisa 4-aad.

2. Doorashada dhammaadka muddada xilka, waxaa lagu qabanayaa sida waafaq san qodobada kor ku xusan ee qaybta IV ee Xeerkan.

Qodobka 33-aad

1. Haddii, xubnaha kale ay go'aan aqlabiyad buuxda ku gaaraan in xubin kamid ah Guddiga uu shaqadiisa ka joogsaday sabab kale oo aan ahayn maqnaansho ku meel gaar ah, Guddoomiyaha Guddiga wuxuu soo ogeysiinayaa Xoghayaha Guud ee Ummadaha Midoobay oo markaas ku dhawaaqaya in jagada xubintaas ay bannaan tahay.

2. Haddii uu dhinto ama uu shaqada ka tego xubinka mid ah Guddiga, Guddoomiyaha wuxuu si deg deg ah u soo ogeysiinayaa Xoghayaha Guud ee Ummadaha Midoobay, isagoo markaas ku dhawaaqaya in jagadu ay bannaan tahay laga bilaabo taariikhda dhimashada ama taariikhda ay dhaqan gasho ka tegidda jagadaas.

Qodobka 34-aad

1. Markii lagu dhawaaqo in jago ay bannaan tahay sida waafaqsan Qodobka 33-aad iyo haddii muddada xilka xubinta la beddelayo aysan dhammaanayn lix bilood gudahood laga bilaabo ku dhawaaqidda bannaanshaha jagada, Xoghayaha Guud ee Ummadaha Midoobay wuxuu mid kasta oo ka mid ah Dalalka Dhinaca ka ah Xeerkan u soo ogeysiinayaa oo markaas laba bilood gudahood soo gudbinayaa magacyada sida waafaqsan Qodobka 29-aad si loo buuxin lahaa jagada.

2. Xoghayaha Guud ee Ummadaha Midoobay wuxuu diyaarinayaa liiska dadka la magacaabay sida xaruufaha magacyadoodu ay u kala horreeyaan, wuxuuna u soo gudbinayaa Dalalka dhinaca ka ah Xeerkan. Doorashada lagu buuxinayo jagada bannaan, ayaa markaas la qaban sida waafaqsan Qodobka Qaybta IV ee Xeerkan.

3. Xubinta Guddiga ee loogu doorto buuxinta jagada bannaanaatay sida waafaqsan Qodobka 33-aad wuxuu jagadaas haynayaa ilaa muddada u harsanayd xubinta Guddiga ee jagada bannaysay, sida waafaqsan qodobkaas.

Qodobka 35-aad

Xubnaha Guddiga ayadoo uu oggolaaday Golaha Guud ee Umma da ha Midoobay, waxay ka qaadanayaan ilaha Ummadaha Midoobay mushaharooyin oo uu shuruuda ha u gooyey Golaha Guud isagoo tixgelinaya ahmiyadda xilalka Guddiga.

Qodobka 36-aad

Xoghayaha Guud ee Ummadaha Midoobay wuxuu Guddiga u gudbinayaa shaqaalaha iyo tashiilaadka lagama maarmaanka u ah fulinta hawshiisa ku saabsan Xeerkan.

Qodobka 37-aad

1. Xoghayaha Guud ee Ummadaha Midoobey wuxuu ku qabanayaa fadhiga ugu horreeya ee Guddiga, Xarunta Ummadaha Midoobey.

2. Kaddib fad higa ugu horreeya, Guddigu wuxuu kulmaya waqtiyada lagu sheego habka shaqada.

3. Guddigu wuxuu caadi ahaan ku kulmaya Xarunta Ummadaha Midoobey ee Geneva.

Qodobka 38-aad

Xubin kasta ee Guddiga, inta uusan bilaabin hawlahiisa, wuxuu Guddiga hortiisa ku baaqayaa inuu qaban doono hawlihiisa leexleexasho la'aan iyo si niyadsami leh.

Qodobka 39-aad

1. Guddigu wuxuu xubnihiisa u dooranayaa muddo labo sano ah. Mar labaadna waa la dooran karaa.

2. Guddigu wuxuu degsanayaa habkiisa shaqo, hase yeeshee nidaamkaas waa lagu qoraa:

(b). In Guddiga fadhiyadiisa ay ansaxayaan marka ay ka qayb galaan 12 xubnood.

(t). Go'aanada Guddiga waxaa lagu gaarayaa aqlabiyadda codadka xubnaha intooda badan ee markaas jooga.

Qodobka 40-aad

1. Dalalka Dhinaca ka ah Xeerkan waxay ballan qaadayaan inay soo gudbiyaan warbixinno la xiriirta tallaaboo yinka ay qaadeen oo dhillinayaa xuquuqda halkan lagu aqoonsaday iyo horumarka laga gaaray ka intifaacidda xuquuqdaas.

(b). Hal sano gudihiisa laga bilaabo dhaq an galka Xeerkan, Dalalka Dhinaca ka ah Xeerkan ee arrintu saameyso.

(t). Markaas kaddibna markasta uu Guddigu soo codsaso.

2. Dhammaan warbixinada waxaa loo soo gudbinayaa Xoghayaha Guud ee Ummadaha Midoobay, oo markaas u soo gudbinaya Guddiga si uu u baaraandego. Warbixinada waxaa lagu qorayaa arrimaha iyo mashaakilka haddii ay jiraan oo raad ku yeelanaya fulinta Xeerkan.

3. Xoghayaha Guud ee Ummada ha Midoobay, kaddib marka uu la tashado Guddiga, wuxuu u soo gudbinayaa Hay'adaha gaar ahaaneed, nuqullada qaybaha warbixinada oo khuseya awooddooda.

4. Guddigu wuxuu akhirinayaa warbixinada ay Dalalka Dhinaca ka ah Xeerkan u soo gudbiyeen. Guddigu wuxuu kaddib uu ku lifaaqayaa faallada uu ka qabo warbixinada, u soo gudbinayaa Dalalka Dhinaca ah. Guddiga wuxuu faaladiisa u soo gudbinayaa Golaha Dhaqaalaha iyo Bulshada, isagoo raacinaya nuqullada warbixinada uu ka helay Dalalka Dhinaca ka ah Xeerkan.

5. Dalalka Dhinaca ka ah Xeer kan wuxuu Guddiga u soo gudbinaya wixii uu ka qabo faalada lagu sameeyey sida waafaqsan xubinta 4-aad ee Qodobkan.

## Qodobk a 41-aad

1. Dalka Dhinaca ka ah Xeerkan wuxuu markasta qodobkan ku dhawaaqi kara in uu aqoonsaday awoodda Guddiga ee helidda iyo falanqeynta warbixinada ku saabsan dacwadda uu keeno Dal Dhinac ah kuna eedeeyo Dal kale oo Dhinaca ka ah Xeerkan uusan fuli-nayn waajibaadka ka khuseya Xeerkan. Arrimaha ku saabsan qodobkan waxaa la aqbali kara lana tixgelin karaa haddii uu soo gudbiyey Dal Dhinaca ka ah oo ku baaqay inuu aqoonsan yahay awoodda Guddiga. Guddigu ma aqbali karo warqado haddii ay saameeyaan Dal Dhinaca ka ah oo aan sameynin caddeyntaas. Warqadaha la aqbalay sida waafaqsan qodobkan, waxaa lagu dhigayaa habka soo socda:

(b). Haddii Dal Dhinac ka ah Xeerkan ay la noqoto in Dal kale oo dhinac ka ah uusan tixgelinayn qodobada Xeerkan, wuxuu qoraal ahaan arrinta u soo gaarsinayaa Dal Dhinac ka ah. Saddex bilood gudahood laga bilaabo taariikhda helidda warqa daha Dalka helay wuxuu Dalka u soo diray, u soo gud-binayaa qoraal caddeynaysa arrinta ayadoo lagu muujiyey intii suuragal ah hababka dalka, iyo tallaabooyinka xallinta ee la qaaday, wixii ka hartay ama wixii suuragal ah ee laga xallinayo arrinta.

(t). Haddii arrinta xallinteeda aysan raalli ka noqon labada dal ee dhinaca ka ah, lix bilood gudahood kaddib helidda warqadaha hore ee Dalka loo soo gudbiyey, Dalalka mid kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu arrinta u soo gudbiyo Guddiga isagoo uu soo ogeysiinaya Guddiga iyo Dalka kaleba.

(j). Guddigu wuxuu arrinta loo soo diray, dhameynayaa, kaddib markii uu xaqiiqsado in dhammaan tallaabooyinka gudaha ee lagu xallin lahaa arrinta ay dhammaadeen, sida waafaqsan mabaadiida guud ee Sharciga Dawliga ee la aqoonsanyahay. Nidaamkan lama taacayo haddii ku dabbaqidda tallaabooyinka xallinta ay qaateen muddo aad u dheer.

(x). Guddigu wuxuu q abanayaa fadhiyo qarsoodi ah markii uu baarayo warqadaha ku saabsan qodobkan.

(Kh). Ayadoo la tixgelinayo xarafka (j), Guddigu wuxuu Dalalka Dhinaca ah u suurtagelinayaa inay isticmaalaan Xafiiskiis a si ay u helaan xal saaxibtinimo ah oo ku saabsan arrinta ayadoo saldhig ka dhigayaan dhowridda xuquuqal-Insaanka iyo xuriyadaha xasaasiga oo loogu aqoonsaday Xeerkan.

(d). Arrin kasta oo loo soo gudbiyey, Guddigu wuxuu Dalalka Dhinaca ka ah ee arrintu saameyso laguna tixraacay xarafka (t), ka codsan kara inay u soo gudbiyaan xog ogaalka ku saabsan arrinta.

(r). Dalal ka Dhinaca ah ee arrintu saameyso, laguna tixraacay xarafka (t), waxay xaq u leeyihiin in la dhegaysto, markii arrinta laga tixgelinayo Guddiga, soona bandhigo caddeyntiisa af-ahaan iyo/ama qoraal-ahaan;

(s). Guddigu wuxuu, toban iyo laba bilood gudahiisa, laga bilaabo taariikhda helidda ogeysiiska ku qoran xarafka(t), soo gudbinayaa warbixin:

(i). Haddii la gaaray xallinta waafaqsan xarafka (kh),Guddigu wuxuu warbixintiisa ku koobayaa caddeyn yar oo ku saabsan xaqiiqada iyo xallinta la gaaray.

(ii). Haddii aan la gaarin xallinta waafaqsan xubinta(kh), Guddigu wuxuu ku koobayaa warbixintiisa caddeyn yar oo ku saabsan xaqiiqada; Qoralllada iyo warqadaha ku qoran xaddeynta af-ahaan sameeyey Dalalka Dhinaca ka ah ee arrintu saameysay, waxaa lagu lifaaqayaa warbixinta.

Arrin kasta, warbixinteeda waxaa loo soo gudbinayaa Dalalka Dhinaca ka ah ee arrintu saameyso.

2. Qodobkan wuxuu dhaqangelayaa markii toban dal oo dhinaca ka ah Xeerkan ay sameyaan caddeymmo ku saabsan lambarka 1-aad ee Qodobkan. Dalalka Dhinaca ah waxay caddeymahaas u gudbinayaan Xoghayaha Guud ee Ummadaha Midoobay, oo markaas nuqullo ka mid ah u gudbinaya Dalalka kale ee Dhinaca ka ah. Caddeynta waa lala noqon karaa markasta ee la soo ogeysiiyo Xogh ayaha Guud. Kala noqoshada ma waxyeelaynayso tixgelinta la siinayo arrinta oo ku saabsan warq adaha horeba lagu soo diray qodobkan; Wax warqad oo kale laga aqbali maayo Dalka Dhinac ka ah, kadib markii uu bixiyey ogeysiinta kala noqos hada caddeynta oo uu helay Xoghayaha Guud, haddii uusan Dalka Dhinaca ka ah u soo sameynin caddeyn cusub.

<u>Qodobka 42-aad</u>

1.(b). Haddii arrinta loo gudbiyey Guddiga sida waafaqsan qodobka 41-aad aan la xallin ayagoo raalli ka noqon Dalalka Dhinaca ka ah ee arrintu saameyso, Guddigu wuxuu, isagoo oggollaansho hore ka haysta Dalalka Dhinaca ka ah (oo halkan lagu tilmaamay Guddi-hoosaad). Guddi-hoosaadka wuxuu khidmadihiisa u suurtagelinayaa Dalalka Dhinaca ka ah ee ay arrinta saameyso, si xal saabtinimo ah looga gaaro ayadoo la dhawrayo Xeerkan.

(t). Guddi-hoosaadku wuxuu ka koobnaanayaa Shan qof oo ay oggolyihiin Dalalka Dhinaca ka ah oo ay arrintu saameyso. Haddii Dalalka Dhinaca ka ah ay ku gefaan heshiis saddex bilood gudahood dhammaan ama qaar ka mid xubnaha Guddi-hoosaadka, xubnaha Guddi-hoosaadka oo aan lagu heshiinin, waxaa lagu dooranayaa cod qarsoodi ah ayadoo la raacayo aqlabiyadda codadka saddex meelood laba meel ee xubnaha Guddiga Dhexdooda.

2. Xubnaha Guddi-hoosaadka waxay ku shaqeynayaan awooddada shakhsiyeed. Ma noqonayaan muwaadiniinta Dalalka Dhinaca ka ah oo ay arrintu saameyso ama Dal aan Dhinac ka ahayn Xeerkan ama Dal Dhinac ah oo aan saameynin caddeynta ku tilmaaman qodobka 41-aad.

3. Guddi-hoosaadku wuxuu dooranayaa Guddoomiyahiisa isagoo degsanaya habkiisa shaqo.

4. Fadhiyada Guddi-hoosaadku waxaa caad-ahaan lagu qabanayaa Xarunta Ummadaha Midoobay ama Xafiiska Ummadaha Midoobay ee Geneva. Hase yeeshee waxaa lagu qaban karaa meelo kale oo habboon ee uu soo tilmaamo Guddi-hoosaadku isagoo la tashanaya Xoghayaha Guud ee Ummadaha Midoobay iyo Dalalka Dhinaca ka ah oo ay arrintu saameyso.

5. Xoghaynta ku qoran qodobka 36-aad waxay kaloo u shaqeynaysa Guddi-hoosaadyada ee lagu magacaabay qodobka .

6. Xog-ogaalka uu helay iyo wixii uu ururiyey Guddigu, waxaa loo bandhigayaa Guddi-hoosaadka ayadoo Guddi-hoosaadku Dalalka Dhinaca ka ah ee arrintu saameyso ka codsan karo inay u soo gudbiyaan xog-ogaalka kale ee saameya arrinta.

7. Markii Guddi-hoosaadku uu arrinta u tixgeliyo, laakiinse muddadaas aysan marna ka badan karin toban iyo laba bilood laga bilaabo kadib markuu helay arrinta, wuxuu u soo gudbinayaa Guddoomiyaha Guddiga warbixin si loogu gudbiyo Dalalka Dhinaca ka ah oo ay arrintu saameyso.

(b). Haddii uu Guddi-hoosadku uu dhammayn waayo arrinta toban iyo laba bilood gudahood, wuxuu warbixintiisa ku koobayaa caddeyn ku saabsan xaaladda arrinta.

(t). Haddii la x alliyo arrinta ayadoo la dhowrayo xuquuqal-Insaanka lagu aqoonsaday Xeerkan, Guddi-hoosaadka wuxuu warbixinteeda ku koobaysaa caddeyn yar oo ku saabsan xaqiiqada iyo xallinta la gaaray.

(j). Haddii xallinta lagu gaari waayo shuruudaha lagu tilmaamay xarafka (t) warbixinta Guddi-hoosaadka waxaa lagu qorayaa baarista dhammaan su'aasha ku saabsan xaqiiqada la xiriirta arrimaha ka dhaxeeya Dalalka Dhinaca ka ah oo arrinta saameyso iyo taladiisa ku saabsan suurtagalka xallinta arrinta. Warbixintan waxaa kaloo lagu darayaa warqado iyo qoraallada caddeymaha afeed ee Dalalka Dhinaca ka ah oo ay arrintu saameyso.

(x). Haddii warbixinta Guddi-hoosaadka lagu soo gudbiyey ayadoo la raacay xarafka (j), Dalalka Dhinaca ka ah oo ay arrintu saameysay, saddex bilood gudahood laga bilaabo helidda warbixinta, waxay o ogeysiinayaan Guddoomiyaha Guddiga in ay aqbaleen warbixinta Guddi-hoosaadka iyo inkale.

8. Wixii ku qoran qodobkan ma saameeyo xilalka Guddigu ee ku qoran qodobka 41-aad.

9. Dalalka Dhinaca ka ah oo ay arrintu saameyso, waxay si siman u qaybsanayaan kharashyada xubnaha Guddi-hoosaadka sida uu soo qiyaasay Xoghayaha Guud ee Ummadaha Midoobay.

10. Xogahayaha Guud ee Ummadaha Midoobay waxaa awwood loo siiyey inuu bixiyo kharashka xubnaha Guddi-hoosaadka haddii loo baahdo, ka hor inta aysan soo gudbin Dalalka Dhinaca ka ah oo ay arrintu saameyso, sida waafaqsan lambarka 9-aad ee qodobka.

## Qodobka 43-aad

Xubnaha Guddiga iyo Guddi-hoosaadka dhexdhexaadinta oo lagu magacaabay qodobka 42-aad waxay xaq u leeyihiin tashiilaadka, bursimooyinka iyo xuquuqda khabiirada laga diro Ummadaha Midoobay sida ku qoran qodobada Xeerka xuquuqda & bursimmoyinka ee Ummadaha Midoobay.

## Qodobka 44-aad

Qodobada fulinta Xeerkan waxaa lagu dabbaqayaa ayadoon waxba laga dhimin hababka la soo tilmaamay oo ku saabsan xuquuqal-Insaanka ama Xeerarka Ummadaha Midoobay iyo Wakaaladaheeda gaarka ah, kamana reebayso in Dalalka Dhinaca ka ah Xeerkan, inay khilaafka raadsadaan hababka kale ee lagu xallinayo khilaafka sida waafaqsan Heshiisyada Caalamiga kuwa guud ama gaarka ah oo ka dhaxeeya ayaga.

## Qodobka 45-aad

Guddigu wuxuu u soo gudbinayaa Golaha Guud ee Ummadaha Midoobay, ayadoo la soo marinayo Golaha Dhaqaalaha iyo Bulshada, warbixinta sannadka ee hawlahiisa.

Qodobka 46-aad

Qodobada Xeerkan laguma fasirayo inay wax uga dhimmaan qodobada Warqadda Ummadaha Midoobay iyo Xeerka Wakaaladaha gaarka oo caddeynayaa xilalka Ururada kala duwan ee Ummadaha Midoobay iyo Wakaaladaha gaarka inta ku saabsan arrimaha uu ka hadlayo Xeerkan.

Qodobka 47-aad

Qodobadan Xeerkan laguma fasirayo inay wax uga dhimmaan xuquuqda xasaasiga ee dhammaan dadyowga inay ku intifaacaan, isticmaalaana hantidooda dabiiciga iyo ilahooda.

QAYBTA VI -AAD

Qodobka 48-aad

1. Xeerkan wuxuu saxiixa u furan yahay Xubin kasta ee Ummadaha Midoobay ama Xubin ka mid ah Wakaaladaha gaarka ah Dalalka Dhinaca ka ah Xeerka Maxkamadda Caalamiga ee caddaallada iyo Dal kasta oo laga casuumay Golaha Guud ee Ummadaha Midoobay inuu Dhinac ka noqdo Xeerkan.

2. Xeerkan wuxuu ku xiran yahay in la meelmariyo. Warqadaha meelmarinta waxaa loo gudbinayaa Xoghayaha Guud ee Ummadaha Midoobay.

3. Xeerkan wuxuu u furan yahay inay oggolaadaan Xubnaha lagu tilmaamay lambarka 1-aad ee qodobkan.

4. Oggollanshaha (Accession) waxaa lagu sameynayaa in loo soo gudbiyo warqadaha oggollaanshaha, Xoghayaha Guud ee Ummadaha Midoobay.

5. Xoghayaha Guud ee Ummada ha Midoobay wuxuu soo ogeysiinayaa dhammaan Dalalka ay saxiixeen Xeerkan ama ay oggolaadeen, markasta warqadaha meelmarinta ama oggollaanshaha loo soo gudbiyo.

Qodobka 49-aad

1. Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa saddex bilood gudahood kadib taariikhda loo soo gudbiyo Xoghayaha Guud ee Ummadaha Midoobay

warqadda soddon iyo shanaad ee meelmarinta ama oggollaanshaha.

2. Dalkasta oo meelmarinaya Xeerkan ama oggolaanaya kaddib marka la keeno warqadda soddon iyo shanaad ee meelmarinta ama oggolaanshaha, Xeerkan wuxuu u dhaqan gelayaa saddex bilood kaddib taariikhda gudbinta warqaddiisa meelmarinta ama oggolaanshaha.

## Qodobka 50-aad

Qodobada Xeerkan wa xay saameynayaan dhammaan qaybaha Dalalka ayadoo aan waxba laga reebin.

## Qodobka 51-aad

1. Dalkasta oo dhinac ka ah Xeerkan wuxuu soo jeedin karaa beddelaad wuxuuna u soo gudbin karaa Xogahayaha Guud ee Ummadaha Midoobay. Markaas kadib Xoghayaha Guud wuxuu beddelaadda lagu tala jiro u soo bandhigayaa dhammaan Dalalka Dhinaca ka ah Xeerkan, isagoo kaga codsanaya inay u soo ogeysiiyaan in ay doonayaan shir ay isugu yimaadaan Dalalka Dhinaca ka ah si ay kaga hadlaan codna ka bixiyaan talooyinka. Haddii ugu yaraan saddex meelood hal meel dalalka Dhinaca ka ah ay doonayaan shir caynkaas ah, Xoghayaha Guud wuxuu isugu yeerayaa shirka Ummadaha Midoobay.

Beddelaadda lagu go'aansado aqlabiyadda Dalalka Dhinaca ka ah oo jooga codna ka bixiyey shirka, waxaa loo gudbinayaa Golaha Guud ee Ummadaha Ummidoobay sida uu u oggolaado.

2. Beddelaadda waxay dhaqangelayaan markii laga oggolaado Golaha Guud ee Ummadaha Midoobay ayna oggolaadaan saddex meelood laba meel aqlabiyadda dalalka dhinac ka ah Xeerkan sida waafaqsan hababkooda Dastuuriga ah.

3. Markii ay dhaqangelaan beddelaadda, waxay khasab ku noqonayaan Dalalka Dhinaca ah oo oggolaaday, Dalalka kale ee Dhinaca ka ahna waxaa saameeya qodobada Xeerkan iyo beddelaadd hore oo ay oggoladeen.

Qodobka 52-aad

Inkastoo la sameeyey ogeysiisyada ku qoran qodobka 48-aad xubinta 5-aad, Xoghayaha Guud ee Ummadaha Midoobay wuxuu kaga arrimaha soo socda wareglinayaa dhammaan Dalalka lagu tilmaamay lambarka 1-aad ee isla qodobkaas;

(b). Saxiixyada, meelmarinta iyo oggolaanshaha ku xusan qodobka 48-a ad.

(b). Taariikhda dhaqangalka ee Xeerkan ayadoo la tixgelinayo qodobka 49-aad iyo taariikhda dhaqangalka beddelaad kasta oo la sameeyey sida waafaqsan qodobka 51-aad.

Qodobka 53-aad

1. Xeerkan oo ku qoran afafka Shiinaha, Ingiriiska, Fransiiska, Ruushka iyo Isbaanishka waxay kulligood yihiin Rasmi, waxaana loo gudbinayaa xusuusdhowrka Ummadaha Midoobay.

2. Xogahayaha Guud ee Ummadaha Midoobay wuxuu nuqullo la tasdiiqay oo ku saabsan Xeerkan u gudbinayaa Dalalka lagu tilmaamay qodobka 48-aad.